



Ogeysiista iyo Oggolaanshaha Caawimaada Hore ee Qiimaynta Laamaha kaladuwan iyo Qiimaynta Ilmaha

Magaca Ilmaha _____

Taariikhda Gudbinta _____

Magaca Waalidka _____

Ilmahaaga waxa loo gudbiyay Shabakadda Horumarinta Dhalaanka (Early Development Network (EDN). Dugsiga _____ Dadweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in lagu sameeyo qiimaynta laamaha kaladuwan ilmahaaga si loo go'aamiyo u-qalmitaanka adeegyada Shabakadda Horumarinta Dhalaanka.

Degmadu waxay soo jeedinaysaa in la qiimeeyo ilmahaaga sababtoo ah:

Habka qiimeynta laamaha kaladuwan waa in lagu dhammeeyaa 45 maalmood gudahood laga bilaabo wakhtiga gudbinta ay heshay Shabakadda Horumarinta Dhalaanka. Haddii ay jiraan duruufo qoys oo gaar ah, nidaamka qiimaynta iyo imtaxaanka waxa laga yaabaa in dib loo dhigo.

Qaybaha soo socda waa sharaxaadda qaybaha qiimaynta laamaha kaladuwan ee degmadu soo jeedinayso in la sameeyo.

Macluumaad Dheeraad ah	
Horumarinta La Qabsiga	
Garashada	
Horumarinta Jirka (ay ku jiraan aragga iyo maqalka)	
Horumarka Bulshanimada iyo Dareenka	
Horumarinta Hadalka iyo Luuqadda	
Mid kale	

Haddii ilmahaaga la go'aamiyo inuu u qalmo adeegyada EDN, qiimayn ilmo ayaa la samayn doonaa si loo ogaado awoodaha iyo baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga ee dhammaan dhinacyada horumarka iyo adeegyada cawimaada hore ee ku habboon buuxinta baahiyahaas. Oggolaanshaha ayaa loo baahan yahay kahor dhamaystirka qiimaynta ilmahaaga. Qiimaynta ilmahaaga waa inay ku jiraan:

- a. dib u eegista natiijada qiimaynta, haddii la sameeyo;
- b. u fiirsashada ilmahaaga; iyo
- c. ogaanshaha baahida ilmahaaga ee mid kasta oo ka mid ah aagagga korriinka ee xaalada guud ee hawlaha joogtada ah iyo nashaadaadka qoyskaaga.

Bixi Oggolaanshaha bilowga Qiimaynta/Imtaxaanka Ilmaha (haddii uu xaq u leedahay)

Waxaan helay nuqulka Ogeysiiska Caawimaada Hore ee Qiimaynta Laamaha Kaladuwan iyo Qiimaynta Ilmaha; waan fahmay xogta Ogeysiiska oo **WAXAAN U OGOLAANAYAA** Qiimeynta Laamaha Kaladuwan iyo Qiimeynta Ilmaha (haddii uu u qalmo) lagu sheegay Ogeysiiska. Waan fahmayaa in oggolaanshahani yahay mid ikhtiyaari ah iyo inaan ka laaban karo oggolaanshaha wakhti kasta. Haddii aniga/anaa aan ka noqdo oggolaanshaha, waxaan fahamsanahay in uusan dib u soo noqonayn.

Saxeexa Waalidka _____	Taariikhda _____
------------------------	------------------

Ma Bixinaayo Oggolaanshaha Qiimeynta Hore

Waxaan helay nuqulka Ogeysiiska Caawimaada Hore ee Qiimaynta Laamaha Kaladuwan iyo Qiimaynta Ilmaha; waan fahmay xogta Ogeysiiska, **MANA BIXINAAYO OGOLANSHAHA** Qiimeynta Laamaha Kaladuwan iyo Qiimeynta Ilmaha (haddii uu u qalmo) lagu sheegay Ogeysiiska.

Saxeexa Waalidka _____	Taariikhda _____
------------------------	------------------

Waalidiinta carruurta looga shakisan yahay naafanimada waxay leeyihiin difaacyo ku qoran ilaalinta nidaamka ee Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA). Nuqul ka mid ah "Qaybta C Ilaalinta Nidaamka," iyo sidoo kale hababka gudbin cabashada iyo codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa lagu baxshay ogeysiiskan. Waa inaad si taxadar leh u akhridaa macluumaadka, haddii aad su'aalo ka qabto xuquuqdaada, waxaad la xiriiri kartaa:

Magaca Xiriirka _____	oo aad ka wacayso _____
-----------------------	-------------------------

Macluumaad Dheeraad ah

Waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah ilaha soo socda si ay kaaga caawiyaan inaad fahamto sharciyada federaalka iyo gobolka ee waxbaridda carruurta naafada ah iyo xuquuqda waalidnimo ee ay bixiyaan sharciyadaas. Sharaxaada xuquuqdaada waxaa bixin doona lacag la'aan mid ka mid ah ururadan soo socda:

Waaxda Waxbarashada Lincoln
(402) 471-2471

Khadka Taleefanka ee Adeegyada Naafada
(800) 742-7594

PTI Nebraska
(800) 284-8520